


# Dugsiga xanaanada ee Queensland

## Waa maxay dugsi xanaano?

Dugsiga xanaanada, oo loo yaqaan 'kindy (dugsi xanaano', waa barnaamij waxbarasho oo hal galin ah oo loogu talagalay carruurta sannadka ka horreeya diyaargarowga (sanadka koowaad ee dugsiga ee Queensland). Dugsiga xanaanadu waa meel uu ilmahaagu wax uga baran doono waayo-aragnimada ciyaaraha iyo isdhexgalada taageeraya waxbarashadooda hore, fayoobaantooda iyo horumarkooda. Markay dugsiga xanaanada ka qayb qaataan, carruurtu waxay kobciyaan jacaylka waxbarashada waxaana lagu taageeraa u gudbitaankooda Diyaarinta.

Barnaamijyada dugsiga xanaanada ayay ansixisay dawladda Queensland waxaana bixiya macalin aqoon leh oo waxbara caruurta intay yaryihiin. Barnaamijyada dugsiga xanaanada waxaa lagu bixin karaa xarumaha waxbarashada dhalaanka; miyi iyo kuwo fogaan araga la doortay iyo dugsiyo dawladeed oo kale oo la soo xulay halkaas oo ay jireen caqabadaha helitaanka dugsiga xanaanada; iyo waxbarashada fogaanta ama dugsiga Xanaanada internetka wax looga barto carruurta qaarkood ee aan heli karin xarun.

## Wax ku barashada dugsiga xanaanada

Dugsiga xanaanada waxay siisaa carruurta yaryar fursadaha ay:

- ku isticmaalaan luqadda si ay xiriirka uga sameeyaan fikradaha, dareenka iyo baahiyaha
- ku samaystaan saaxiibo, la falgalaan oo ay dadka kale la shaqeeyaan
- ku gartaan ciladaha ayna samaystaan xirfadaha xallinta mashaakilaadka
- ku noqdaan kuwo aad ugu kalsoon oo ay ugu madax-banaanaadaan awoodahooda
- kula xidhiidhaan, sahamiyaan oo ay waxna ugu biiriyaan adduunkooda
- ku dhistaan aqoontooda oo ay sahamiyaan fikrado cusub, iyadoo ka caawinaysa inay dhisaan kalsoonidooda.

KINDY for all

Somali - Soomaali

Queensland Government

# Sida laysku diiwaan geliyo

Queensland, carruurtu waxay dhigan karaan dugsiga xanaanada sanad ka hor intaysan bilaabin Diyaargarowga (Prep). Adeeg kastaa wuu kala duwan yahay qaarna waxa laga yaabaa inay ku jiraan liiska sugitaanka, markaa waa fikrad wanaagsan inaad kala hadasho adeega aad dooratay wakhtiga ugu fiican ee aad ilmahaaga ku diwaangelin karto.

Ilmahaagu waa inuu jiraa 4 sano marka la gaaro 30-ka Juun sanadka ay is diwaangeliyaan si ay dugsiga xanaanada uga qayb qaataan.

| Xilliguu ilmaha dhashay | Ilmuhu waxuu dhigan karaa dugsiga xanaanada |
|---|---|
| 1 Luulyo 2018 ilaa 30 Juun 2019 | 2023 |
| 1 Luulyo 2019 ilaa 30 Juun 2020 | 2024 |
| 1 Luulyo 2020 ilaa 30 Juun 2021 | 2025 |
| 1 Luulyo 2021 ilaa 30 Juun 2022 | 2026 |
| 1 Luulyo 2022 ilaa 30 Juun 2023 | 2027 |
| 1 Luulyo 2023 ilaa 30 Juun 2024 | 2028 |

Waxaad u baahan doontaa si aad u diwaangeliso ilmahaaga:

- magaca iyo ciwaanka ilmahaaga
- macluumaadkaaga maadaama aad tahay waalidkood, daryeelahooda ama qofka masuulka ka ah
- faahfaahinta amar kasta oo maxkamad kasoo baxay ama amarada ama qorshayaasha barbaarinta
- faahfaahinta wixii taageero dheeraad ah loo baahan yahay (tusaale naafanimo, xasaasiyad cunto ama baahiyo kale)
- caddaynta taariikhda dhalashada (tusaale, warqadda dhalashada)
- heerka caafimaadka iyo talaalka
- faahfaahinta dadka loo oggolyahay inay soo qaadaan ilmahaaga iyo cidda la wargelinayo markay dhacdo xaalad degdeg ah.

Adeeggaagu wuxuu ka dhigi doonaa macluumaadkan mid sir ah oo waxaad si buuxda u heli doontaa xogta ilmahaaga.

# Doorashada barnaamijka dugsiga xanaanada

Dhammaan carruurta Queensland waxay xaq u leeyihiin inay ka qayb galaan barnaamijka xannaanada ee la ansixiyey sanadka ka horreeya Diyaargarowga (Prep).

Barnaamijka xannaanada ee la ansixiyey waxa uu buuxiyaa hab-raaca dawladda,:

- waana barnaamij waxbarasho oo ay bixiyaan macalimiin aqoon leh oo wax u bara dhalaanka, si waafaqsan hab-raaca dawladda.
- waxaana sida caadiga ah lagu bixiyaa 15 saacadood toddobaadkii, 40 toddobaad sannadkii, carruurta sannadka ka horreeya Diyaargarowga
- waxuuna la jaanqaadaa hab-raaca waxbarashada Dugsiga xanaanada ee Queensland ama barnaamij kale oo Manhajka iyo Qiimaynta Maamulka Queensland ay aqoonsan tahay.

Si aad gacan uga geysato aqoonsiga barnaamijka ay oggolaatay Dowladda Queensland, raadi 'kindy tick of approval', taasi waa sawirka hoos ka muuqda.

# Waa maxay kharashka ku baxa dugsiga xanaanada

Laga bilaabo 2023, dawladda Queensland waxay dugsiga xanaanada uga dhigaysa qoysas badan oo Queensland degan mid jaban. Haddii aad dhiganayso dugsiga xanaada kalfadhiga xanaanada ama Dugsiga xanaanada daryeel maalmeed maalinta inta badan ah waxa laga yaabaa in aad u qalanto xanaano lacag la'aan ah ama xanaano qiima jaban.

Kharashyada daryeelku way kala duwan yihiin iyadoo ayna ku xidhan tahay adeegga. Kala xidhiidh xanaanaada aad door bidayso wixii faahfaahin ah ee ku saabsan kharashkooda. Waxaad booqan kartaa www.qld.gov.au/Kindysavings si loo hubiyo inaad u qalanto xanaano qiima jaban ama bilaash ah.

Xanaanada lacag la'aanta ah ama qiimaha jaban ayaa la siiyaa qoysaska xaqa u leh, oo ay ku jiraan qoysaska ilmaha korsanaya, kuwaas oo:

- haysta Kaarka Daryeelka Caafimaadka ee Dawladda Australia (HCC) (ama haysta ilmo isagu leh)
- haysta Kaarka Dhimista Hawlgabka ee Dawladda Australia hadda (gunnooyinka tooska ah ee HCC)
- haysta Kaarka Dahabka ah ee Waaxda Arrimaha Ciidanka ama Kaarka Cad
- haysta xidhiidh rasmi ah, sida warqad, oo ka socota wakaalada ay khusayso oo sheegaysa ujeedada ay siinayso HCC
- haysta caddaynta ilma korinta rasmiga ah ama qabanqaabada daryeelka qaraabada
- loo aqoonsaday inay yihiin Aboriginal iyo/ama Torres Strait Islander (ama haysta ilmo asagu ah)
- leh saddex carruur ah ama ka badan, oo isku da' ah, oo la diiwaangaliyay isla sanadkaas.
- haysta ilmo loo aqoonsaday inuu ku nool yahay meelaha ilaalinta ilmaha ee ka baxsan nidaamka daryeelka guriga
- Australia ku soo galay Barnaamijka Qaxootiga iyo Bani'aadantinimada ee Dawladda Australia, ama ku jira nidaamka magangelyo raadinta oo ay haystaan fiisaha ku meel gaarka ah.

Kaalmada xanaanada bilaashka ah ama qiimaha jaban waxaa si toos ah loo siiyaa adeeg bixiyahaaga. Waxa laga yaabaa inay dhimayso kharashaadkaaga jeebka laga bixiyo. Waxaa la sheegan karaa hal mar, xitaa haddii aad buuxiso shuruudo badan.

Qoysaska u qalma Dheefaha Cashuurta Qoyska ee Dawladda Australia waxay kaloo xaq u yeelan karaan kharashyo la dhimay.

Qoysaska leh carruurta ka qaybqaata barnaamijka xanaanada ee ka tirsan goob xanaano maalmeed dheer waxay sidoo kale xaq u yeelan karaan Kaalmada Daryeelka Ilmaha ee Dowladda Australia.

Macluumaad ku saabsan u-qalmitaanka deeqaha dawladda Australia waxa laga heli karaa Centrelink.

**Macluumaad dheeraad ah**
**Booqo www.qld.gov.au/kindy**